



## Xafiiska Qaramadam Midoobay u Qaabilsan Arimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

### Warqad ku socota Soomaalida Qurbaha ku nool (No. 1)

Nairobi, 28 Meey 2008

As-Salaamu Alaikum,

Markii u dambeysay ee aan idiin soo waramo waxay ahayd intii uusan qabsoomin wareegii koobaad ee shirkii wadahalada Soomaaliyeed, kasoo ku beegnaa 10 - 16 Meey 2008. Anigoo maskaxda ku haya sida beexada leh ee aad uga qayb qaadataan arimaha dhaqaalaha Soomaaliyeed iyo sida aad taageersantihiin uguna howshoosantihiin arimaha Soomaaliya, waxaa ila godboonaatay in aan warbixin idinka siiyo waxii horumara ee la gaaray.

Waxaan aad ugu faraxasanahay taageerida baaxada leh aay soo siiyeen dadka dalka dibadiisa ku nool wareegii koobaad ee wadahaladii Jabuuti, taasoo ka maragkacaysa sida aay u taageersanyihiin dib u soo celinta nabada, amaanka iyo kala dambayta.

Iyadoo la joogo waqtigii uu qabsoomi lahaa wareega labaad ee wadahalada ayaan hada go'aansaday in aan marlabaad idinla soo xariiro, taasoo muujinaysa muhiimada aan siinayo aragtida dadka Soomaaliyeed ee dalka dibadiisa ku nool ha ahaadeen dhalinyaro iyo doqowba.

Waxaan dareemay in marka laga hadlayo arimaha nabada Soomaaliya in wadamo badani aay arimihii la soo dhaafay ee ku saabsanaa dagaalka iyo is qabqabsiga Soomaalida, aay mar walba xusuusanayaan kana hadlayaan. Wali ma dareensana in dhaqankii Soomaalida ee ku saabsanaa dagaalka iyo is qabqabsiga uu is badalayo, dabcan dhibaato ayaa lala kulmayaa si nabad loo helo laakin waa la xalin karaa.

Waxaan rabaa in aan idiin sheego wadahaladii u dambeeyay ee Garabyada Soomaalida (TFG & Maxakamadaha) ay yimaadeen waqtigii loogu talo galay, kuna yimaadeen tiro kooban, aakhirkiina ay soo saareen hadal macquula.

Hurumarkani waa tilaabo bilow ah. Wadahaladu waxaa laga yaabaa in ay culays ku abuuraan qaybo ka mida bulshada Soomaaliyeed, wallow ay saas tahay hadana waa in ay nabadi ka dhex dhalataa dadka wallaalaha, taasoo ay ku xiran tahay garashada iyo wadaninnimada dadka Soomaaliyeed ee ku nool gudaha iyo dibada wadanka.

Shirkaan soo socda ee Jibooti wuxuu ka koobnaan doonaa labo qaybood:

1. Warreega labaad ee wadahalada wuxaa ka qayb gali doona wafuut tiradeedu ay koobantahay, wadahalalkuna wuxuu socon doonaa mudo xadidan taasoo ka bilaabanaysa 31 Meey 2008.
2. Waxaa kaloo jabuuti booqasho ku tagaya Xubnaha Golaha Amaanka ee Qaramada Midoonay inta u dhaxaysa 2 – 3 Juun. Waxaan ku marti qaaday Xubnaha Golaha Amaanka in ay booqdaan Muqdisho si ay xaqiiqda jirta indhahooda ugu soo arkaan, laakiin waxaan ka xumahay in ay Muqdisho taki karin nabad galyo xumi darteed. Taa badelkeeda waxay booqanayaan Jabuuti si ay wadahal ula yeeshaan Garabyada Soomaaliyeed, Bulshada Rayidka iyo Dadka Daneeya arimaha hada dhacaya. Safarka xubnaha Golaha Amaanka waxuu ka mid yahay safaro ay ku kala bixinayaan wadamo ka mida Africa sida: Suudaan, Jaad, Koongo iyo Ayforikoost.

Sidii horay la'idinkaga bartay, waxaan hubaa dadkiina wadaniyiinta ah ee Soomaaliyeed, in aad taageero buuxda nagu siin doontaan arimaha dib u heshiisiinta wadankiina, tasoo lagama maarmaan u ah hawlihiina ku aadan arimaha nabada wadankiina.

Wallaalkiin,

Ahmedou Ould-Abdallah